Hagis loogu talaggalay hooyada uurka leh Heeganka

Baaritaanka tiibiishada ee hooyada uurka leh.

Waa maxay tiibiishada ama qaaxada?

Tiibishada ama qaaxada waa xanuun ay keento bakteeriyada la yiraahdo Mycobacterium tuberculosis, taasoo inta badan ku dhacda sambabada qofka, laakiin sidoo kale waxaa laga heli karaa jirka qaybihiisa kale. Tiibishada waxaa lagu kala qaadaa hawada la neefsanaayo. Xanuunkaas waxaa looga bogsadaa daawo loo qaato, qofka Finland joogana baariitaannada iyo daryeelka xanuunku waa u lacag la'aan ama bilaash. Tiibishadu waa xanuun wali ku badan waddamo badan oo adduunka ka mid ah. Finland xanuunkaas waxaa uu ku dhacaa in ka badan 200 oo qof sannadkiiba, qiyaastii kala bar dadka xanuunkaas uu ku dhacayna waa dadka waddanka u soo guuray ee ajaanibta ah. Dadka qaaday cudurka tiibishada ama qaaxada si aad ah ayay uga badan yihiin intaas la soo sheegay. Jirkooda waxaa dhex jiifta bakteeriyada, taasoo macnaheedu yahay in jirkooda ay ku qarsoon tahay. Halista ah in xanuunka uu qofka ku dhaco inta badan waxaa ay dhacdaa sannadka ka dambeeya faafista cudurka, laakiin waxaa dhici karta in cudurka lala xanuunsado tobaneeyo sano kaddib.

Waa maxay sababta haweenka uurka leh looga baaro tiibishada?

Halista ah in xanuunka tiibishada la qaado waa mid aad u weyn xilliga uurka iyo dhalitaanka kaddib. Tiibishada ku dhacda hooyada xilliga ay uurka leedahay, waxaa ay keeni kartaa halista ah dhalitaanka wakhtigiisa ka soo hormara, miisaanka oo hoos u dhaca xilliga dhalmada iyo in ilmaha yar ee markaa dhashay uu dhinto.

Wakhtiga uurka difaaca dabiiciga ah ee jidhka ayaa isbeddela, taasina waxaa ay keentaa in infekshanka tiibishadu uu qofka jirkiisa ku dhex noolaado oo uu xanuun dhab ah noqdo. Cudurka tiibishadu waxaa uu daciifiyaa caafimaadka hooyada. Ilmaha uurka ku jiraa wuxuu cudurka qaadi karaa inta uu uurka ku jiro ama isla marka uu dhasho, cudurku wuxuu halis gelin karaa nafta Ilmaha dhallaanka ah. Hooyada tiibishada qabtaa iyada oo aan ogayn, waxay halis ku gelin kartaa in ay cudurka qaadaan xubnaha kale ee qoyskeeda ama dadka kale ee isbitaalka kula jira ee umusha iyo dhallaanka ah. Ujeeddada baaritaankaan waa sidii loo heli lahaa hooyooyinka xanuunsan, islamarkaana wakhti hore loogu bilaabi lahaa daryeel daawo oo ay ku caafimaadaan. Sidaas ayaa lagu ilaalin karaa caafimaadka hooyooyinka, dhallaanka iyo qoysaska.

Yaa baaritaanka lagu samaynayaa, maxaa la baarayaa, goorma ayaase la baarayaa?

Dhammaan hooyooyinka ka tirsan kooxaha u nugul halista cudurrada waxaa la weydiin doonaa su'aalo ku saabsan astaamaha cudurka, sidoo kale waxaa laga qaadi doonaa sawir ama raajitada sambabada. Xogweydiinta ku saabsan astaamaha cudurka waxaa looga qaadi doonaa neefolada xilliga bilowga uurka, sidoo kalena waxaa lagu weydiin doonaa xarunta qaabilaadda dhalliinka. Raajitada ama sawirka sambabada waxaa la qaadi doonaa qiyaastii bil ka hor dhalitaanka. Sawirka ama raajitada waxaa la hubin doonaa xilli kasta oo ka mid ah xilliyada uurka.

Ma ku jiraa kooxda u nugul halista cudurrada?

Waad ku jirtaa kooxda u nugul halista cudurrada haddii:

- ❖ aad ku dhalatay ama ku soo noolayd waddan ka mid ah dalalka ay ka jirto halista tiibishada
- ❖ aad Finland timid adiga oo qaxooti ah ama magangalyoddoon ah
- ❖ markii aad Finland imaanaysay aad ka timid xero qaxooti ama dhul dagaal ka jiro
- ❖ dadka ehelkaaga ah ay qabeen tiibishada ama adiga laftigaaga aad la xanuunsatay ama ay kugu dhacday tiibishada.

Waa maxay astaamaha cudurka tiibishada?

Astaamaha ugu caansan ee cudurka tiibishada waxaa ka mid ah qufac socda wax ka badan saddex toddobaad, iyo xaako (taasoo ah xab ka soo go'aysa sambabada). Qofka xanuunsanaaya waxaa macquul ah in ay qandho ama xummad

qabato, inuu caatoobo iyo in uu habeenkii dhidido. Xaaladda guud ee qofka iyo rabitaanka cuntada ayaa laga yaabaa in ay daciifaan. Hooyada uurka leh astaamaha tiibishada ee ay isku arkaysaa waxaa macquul ah ina ay noqdaan kuwo yar ama kuwo la mid ah astaamahii caadiga ahaa ee ay dareemeysay xilligii uurka. Sababtaas darteed ayay muhiim u tahay inaad u sheegto waxyaabaha aad dareemayso oo dhan kalkaalisada caafimaadka ama dhakhtarka.

Anigu ma lihi wax astaamo ah, maxaa sababay in la iga qaado raajitada sambabada?

Tiibishada sambabada ee hooyada aan lahayn wax astaan ah oo xanuunka tilmaamaysa, waxaa lagu ogaan karaa in ay cudurka qabto iyo inkale, waa iyada oo laga qaado raajitada sambabada. Haddii la ogaan waayo hooyada oo ay suuraggal tahay in ay qabto cudurka tiibishada, arrinkaas wuxuu keeni karaa in la ogaan waayo qaadista ilmaha uurka ku jiraa uu qaado cudurka, waxaana dhici karta in ilmuhu uu si aad u daran u xanuunsado.

Sababtaas awgeed ayaa raajitada sambabada looga qaadaa haweenka dhalaaya ee aan lahayn astaamaha ee ka tirsan kooxda u nugul halista cudurrada.

Raajitada wax khatar ah uma keeneyso uurjiifka.

Cadaadiska shucaaca ee gaaraaya hooyada ee ka dhalanaaya sawirka raajitada sambabada ee dhijitaalka ah waa mid aad u yar, waxaa uu le’eg yahay oo uu la mid yahay qiyaastii, in le’eg inta qof walbaa ka soo gaarta shucaaca dabeecadda ku hereereysan muddo siddeed maalmood iyo siddeed habeen ah. Sidaas awgeed cadaadiska shucaaca ee gaaraya uurjiifta waa mid intaas aad uga sii yar, sawir qaadistuna wax khatar ah kuma keeneyso uurjiifka. Haddii aad doonayso waxaad arrinkaa kala hadli kartaa kalkaalisada caafimaadka ee neefolada.

Yaa ka mas'uul ah qabanqaabinta sawirka raajitada?

Rugta daryeelka caafimaadka dhallaanka iyo hooyada ee neefolada ayaa kuu direysa raajada, waxaana lagu siinayaa hagista ku saabsan sawir qaadista raajitada. Waa in raajada la iska soo qaadaa, ka hor inta aan la aadin isbitaalka dhalliinka.